

# TILMAAMAHA LA SIIYO BUKAANKA DAWEYNTA WADNAHA IYO XIDIDDADA WADNAHA KLIINIKADA MANKATO

## KORMEERAHA DHACDADA 30KA MAALIN

30 Day Event Monitor - Somali

Bukaanka: \_\_\_\_\_

Taariikhda Ballanka: \_\_\_\_\_ Waqtiga Imaashada: \_\_\_\_\_ am/pm

Goobta: Waaxda Wadnaha Kliinikada Mankato  
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

### Macluumaadka Ballanka

Qiyaas ahaan, ballankaan wuxuu qaataa 30-45 daqiiqo. Kalkaaliyaha Wadnaha ama farsama yaqaanka wuxuu ka hadli doonaa meeleynta iyo isticmaalka qalabka kormeerka (monitor) inta uu socdo ballanka. Bukaanka waxaa la siin doonaa saad dheeraad ah iyo warqado sharaxa isticmaalka iyo hawlaha kormeerka dhacdada. Fadlan wac 507-389-8519 haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan baaristaan ama haddii aad u baahatid in aad dib u dhigatid ballankaan.

### Maxay tahay sababta leyga baahan yahay in aan qaato Qalabka Kormeeraha Dhacdada (Event Monitor)?

Haddii bixiyahaada ay la tahay in loo baahan yahay in lagu kormeero muddo dhowr maalin ama todobaad, markaas waxaad u baahan kartaa koreeraha dhacdada wadnaha (event monitor). Bixiyahaada wuxuu isticmaali karaa qalabka diiwaanka noocan haddii garaaca wadnahaada aan caadiga ahayn uusan badnayn. Kormeeraha wuxuu kuu ogolaadaa in aad qoraalka ku dirtid telefoonkaada una dirtid shaqaalaha caafimaadka kuwaasoo tarjumi doono kaddibna macluumaadka u diri doono bixiyahaada.

### Ku Dhajinta Qalabka Kormeeraha (Monitor):

- Battariyada waxaa lagu meeleeyaa duleelka ku yaal dhinaca qalabka kormeeraha. Waa la xeraa duleelka kaddibna qalabka wuxuu bilaabaa marxaladda tijaabinta. Marka marxaladda tijaabinta dhamaato, qalabka wuxuu diyaar u yahay in lagu meeleeyo bukaanka.
- Waxaa maqaarka lagu nadiifiyaa suufka alkolada kaddibna labo fiilo oo ah qaadeyaasha korantada ECG ayaa lagu dhajiyaa bukaanka. Qaadeyaasha korantada waa in la baddalo saddax maalin kasta ama hadba sida loogu baahdo. Waxaa lagu siiyay qaadeyaal dheeraad ah.
- Kaddibna, bukaanka wuxuu raaci karaa nolol maalmeedkiisa.

### Qorista dhacdada:

- Marka bukaanka isku arko calaamad inta uu qabo qalabka kormeeraha, waa in uu riixo battanka keydka gaduudan ee qalabka. Wuxuu maqli doonaa beeb kaddibna qiyaas ahaan waxay qaadan doontaa 30 sekan si qalabka u keydiyo dhacdada. Waxay keydisaa macluumaadka ilaa 30 sekan ka hor inta aan la riixin battanka iyo hal daqiiqo kaddib. Marka qalabka dhamaysto keydinta macluumaadka, mar kale ayaa la maqli doonaa beeb.
- Qalabka wuxuu awood u leeyahay in uu keydiyo 4 dhacdo ka hor inta aysan tagin xasuusta.

### Dirista macluumaadka la keydiyo

- Marka dhacdo la keydiyo, waa in la diro macluumaadka sida ugu dhakhsiyaha badan.
- Si wanaagsan uma shaqeyaan telefoonada gacanta sida telefoonada dhulka mara. Mar kasta ay suurtoagal tahay, isku day in aad heshid telefoonka dhulka mara si aad u dirtid.
- Wac nambark 800 ee ku qoran warqadaha lagu siiyay si aad u dirtid macluumaadka. Nambarka aad wacdid waa siistem automaatik. Raac tilmaanta kaddibna waxaa laguugu xeri doonaa farsame yaqaan.
- Farsame yaqaanka wuxuu ku weydiin doonaa magacaada iyo nambarkaada aqoonsiga ID. Nambarka aqoonsiga ID wuxuu ku yaal wjiga qalabka kormeeraha, waxaana ku siiya kooxda Wadnaha (Cardiology).
- Marka ay kuu sheegaan in aad dirtid, waxaad meesha lagu hadlo telefoonka kor saartaa qalabka kormeeraha dhacdada kaddibna riix battanka cagaaran ee qaabilsan dirista. Qalabka dhacdada wuxuu samayn doonaa dhawaaq la mid ah sida mashiinka fakska. Bukaanka waa in uusan dhaqaaqin inta la diraaqo. Waxay qaadataa ku dhawaad 90 sekan in la diro.
- Marka qalabka kormeerka joojiyo dhawaaqa, qabso telefoonka kaddibna la hadal farsame yaqaanka si aad u xaqiijisid in ay heleen macluumaadka la diray. Kaddib, bukaanka wuu iska dhigi karaa telefoonka, iyo wuxuu tirtiri karaa macluumaadka ku keydsan.

### Tirtiridda macluumaadka:

- Waxaa jira labo siyaabo oo loo tirtiro macluumaadka la keydiyo. Riix kaddibna ku haay gacanta battanka cagaaran ee keydka ah muddo 5 sekan ilaa uu ka yiraahdo beeb, ama ka saar battariyada kaddibna dib u geli. Tan waxay soo celin doontaa qalabka kormeerka si bukaanka u diiwaan geliyo ilaa afar dhacdo mar kale.

### Qodobada Muhiimka ah ee loo Baahan Yahay in la Xasuusto:

1. Dib u isticmaal qaadeyaasha korantada cusub, 3 maalin kasta ama sida loogu baahdo. Si aad u qabeysatid, waxaad kala saari kartaa fiilooyinka iyo qalabka hase ahaatee ku dhaaf qaadeyaasha korantada.
2. Keydi dhacdooyinka.
3. Dir dhacdooyinka.
4. Tirtir macluumaadka ku keydsan.

